

Soo Xaadirista ayaa Muhiim u ah Arday Kasta

Ardaygaagu wuxuu joogitaan qaas ah ku kordhiyaa bulshada waxbarashada, oo safarka waxbarashaduna waa mid ah qani oo qoto dheer marka aasaaga fasalka ay wax wada bartaan. Ardayda si joogta ah u soo xaadira ayaa aad ugu dhow inay guul ka gaaraan dugsiga iyo wixii ka dambeeyaba. Waxaan ku faraxsanahay inaan kaa kaashano taageeridda waxbarashada iyo soo xaadirista ardaygaaga ee sanadkan!

Waa tan sababta soo xaadirista ay aad muhiim ugu tahay:

- SOO XAADIRISTA IYO GUUSHA:** Soo xaadirista wanaagsan waxay si dhow ula xiriirtaa in dugsiga laga gaaro guul. Marka ardaydu ay dugsiga joogaan maalin kasta, waxay helayaan fursado badan oo ay wax ku bartaan kuna koraan. Dhanka kale, haddii ardaydu ay in badan maqan yihiin, way ku adag tahay inay ku sii socdaan wadada waxbarashada.
 - Dugsiga Hoose/K-3: Ardayda sida joogtada ah u soo xaadira **waxay u badan tahay inay wax ku akhriyaan heerka fasalka.**
 - Dugsiga Dhexe: Marka la gaadho fasalka 6-aad, maqnaanshuhu waa **mid ka mid ah saddexda calaamadood** ee muujinaya in ardaygu ka tagi karo dugsiga sare.
 - Dugsiga Sare: Marka la gaaro fasalka 9-aad, **soo xaadirista ayaa saadaaliye fiican ah oo sheegaya heerarka qalin-jabinta** marka la barbardhigo buundooyinka imtixaanka fasalka 8-aad.
- MAQNAANSHUHU WUU URUURAA:** Maalin kasta oo dugsiiyeed waxay ku xisaabsan tahay safarka koritaanka iyo wax ogaanshaha ee ardayga. Maqnaanshaha joogtada ah waxaa lagu qeexaa 18 maalmood sanadkiiba (ama qiyaastii 2 maalmood bishiiba), xitaa haddii maqnaanshahaas cudurdaar laga bixiyo! Maqnaanshaha intaa le'eg ee dugsiga xanaanada wuxuu hoos u dhigi karaa guusha fasalka 1-aad iyo, ardayda qaar, ilaa fasalka 5-aad.
- DHISIDA KALSOONIDA:** Joogitaanka marka macluumaadka la bixinayo waa muhiim. Marka ardaydu ay seegaan maalin ama cashar, taasi waxay la macno tahay markay soo noqdaan, waxaa laga yaabaa inay seegeen wax muhiim u ah fahamkooda dhawrka maalmood ee soo socda ee waxbarashada. Soo xaadirista joogtada ah ee dugsiga waxay ka caawisaa ardayda inay ku sugnaadaan wadada oo ay dareemaan kalsooni. Marka ardaydu joogaan oo ay si firfircoon ugu hawlan yihiin waxbarashadooda, tani waxay kor u qaadaysaa dhiirigelinta ku soo noqoshada dugsiga maalin kasta.

WAX KA QABASHADA CAQABADAHA: Dugsigaaga ayaa idin taageeri kara adiga iyo ardaygaaga isagoo idinka caawinaya wax ka qabashada caqabadaha ardaygaaga ka fogeynaya dugsiga. Tan waxaa ku jiri kara taageero dheeraad ah sida ka caawinta shaqada dugsiga, wax ka qabashada isu xoogheegashada, taageerada caafimaadka dhimirka, ama arrin kale. Dugsiyadu waxay sidoo kale ku xidhi karaan qoysaska khayraadyada muhiimka ah oo ay ku jiraan gaadiidka, daryeelka caafimaadka, guriyeynta, ama wax kale.

La xidhiidh maamulka dugsigaaga si uu kaaga caawiyo helida xalal si aad wax uga beddesho soo xaadirista ardaygaaga.

Haddii adiga ama ardaygaaga/ardaydaada alyacni iskoollka kuu dhigata aad u baahan tihiin in la idnka taageero soo xaadirista sanadkan, fadlan nala soo xiriir!